

Sida Loo Samaynayo Is-Shaybaadhka Antigen-ka BinaxNOW COVID-19

TALLAABADA 1AAD

Ka helitaanka shaybaadhka goobta shaybaadka.

TALLAABADA 2AAD

Akhri dhamaan tilmaamaha la xidhiidha shaybaadhka.

TALLAABADA 3AAD

Isku baadhida meel aan ahayn goobta shaybaadhka iyo sugitaanka 15-30 daqiiqo natijada.

TALLAABADA 4AAD

Ka tabi natijada **healthvermont.gov/reportresults** oo buuxi foomka gaaban.

Waxaa muhiim ah inaad ka warbixiso natijada shaybaadhkaaga. Jawaabtaadu waa sir.



Adeegyada Turjubaada Luuqada

1. Wac 1-413-216-4975
2. Geli lambarka PIN-ka 6187848 iyo calaamada "#" marka laguu sheego
3. Dhagayso fariinta otomaatigga ah oo dooro luuqada



Wixii waydiimaha guud ah, taageero ayaa la helyaaa 8 subaxnimo ilaa 6 galabnimo iyada oo lala xidhiidhayo (877) 380-3029 amasupport@cic-health.com

Su'aalaha Badanaa La Iswaydiyo (FAQs)

Waa maxay Shaybaadhka Is-Baadhida Antigen-ka BinaxNOW™ COVID-19?

Shaybaadhka Is-Baadhida Antigen-ka BinaxNOW™ COVID-19 waa ateral flow immunoassay oo loogu talo geley in lagu ogaado tayada antigen-ka borotiinka nucleocapsid ee ka yimaada SARS-CoV-2 ee shakhsiyadka qaba ama aan qabin astaamaha ama sababo kale oo safmarka ah oo looga shakiyay caabuqa COVID-19 marka la baadhay laba jeer mudo sadex maalmood ah oo ugu yaraan mudo 36 saacadood ah shaybaadhada u dhaxayso.

Shaybaadhkan waxaa loo ogolaaday in lagu isticmaalo guriga iyada oo aan dhakhtar qorin iyada la isticmaalayo muunadaha qoriga muunada sanka (dulka) gudihiisa soke ee shakhsiyadka 15 sano jir ama ka wayn ah, ama muunadaha qoriga muunadda sanka gudihiisa soke ee dadka waawayn qaadeen ee shakhsiyadka da'doodu tahay laba sano jir ama ka wayn.

Sidee ayuu Shaybaadhka Is-Baadhida Antigen-ka BinaxNOW COVID-19 loo barbardhigi karaa shaybaadhka molikiyuulaarka?

Shaybaadhada antigen-ku waxay aad u khuseeyaan fayraska, laakiin uma wanaagsana sida shaybaadhada molikiyuulaarka oo kale. Waxa uu kani ka dhigan yahay in natijada sheegaysa in cid laga helay caabuqa ay u badan tahay inay sax tahay, laakiin natijada laga waayay meesha kama saarayso in uu qabo caabuqa.

Maxay labada shaybaadh ugu jiraan bushqadda?

Sida uu dhigayo BinaxNOW, shaybaadhku waxaa weeye mid aan dhakhtar qorin/ qofku isagu iska qaadi karo oo ay dadku laba jeer iska qaadaan sadex maalmood gudahood, iyadoo 36 saacadood ay u dhaxayso labada shaybaadh. Labada shaybaadh ee ku jira waxay u ogolaadaan shakhsiyadka inay buuxiyaan isticmaalka lagu taliyay.

Maxay noqonaysaa hadii natijada shaybaadhkayga laga helo?

Hadii shaybaadhkaaga laga helo, waxa aad kaga warbixisaan linkiga ku qoran dhan kale ee kaadhkan. Wixii tilmaamo dheeraad ah, booqo healthvermont.gov/covid19positive

Si aad macluumaad badan uga ogaato Shaybaadhka Is-Baadhida ee Antigen-ka BinaxNOW COVID-19, booqo bit.ly/33uB6Tv